Horumarka ilmagaaha

Heerarka waxbarashada 2016–17 sanad dugsiyeedka

Washington waxay leedahay K-12 heerarka waxbarasho kaas oo qeexaya aqoonta iyo xirfadaha arday kasta u baahan yahay inuu diyaar u yahay xirfadiisa, kuliyada, iyo nolosha marka ay dhameeyaan dugsiga sare.

Xagga hoose waxaa ku yaal tusaalayaal kooban ee himilooyinka waxbarasho ee muhiimka ah ee fasalka 10-aad. Wixii macluumaadka dhammaystiran, booqo:

www.YourChildsProgress.com

- **Farshaxanka.** Kala shaandee xirfadaha horumarka; hirgali, curin oo falanqee muyuusiga; maxaa yeelay fikirka aragti ahaanta qoraal akhriska iyo abuuraha.
- **Waxbarashada Farsamada.** Isticmaal farsamada si aad u caawiso falanqaynta xogta sayniska iyo dastuurada qabyo qoraalka ah.
- **Farshaxanka Luqadda Ingiriisida (ELA).** Falanqaynta jilayaasha adag iyo sida qoraaga fikradiisa loo sameeyay; itimcaal tignoolojiga si aad u soo saarto qoraalada mashruucyada.
- **Waxbarashada Jidhka iyo Caafimaadka.** Samee qorshaha waxbarashada jidhka/caafimaadka iyo xirfadaha qoris akhriska caafimaadka taasoo socon doonta ilaa weynaanta.
- **Xisaabta.** Ardayda dugsiga sare caadi ahaan waxay qaataan algebra I, geometry, iyo algebra II. Waxay u qaaabeeyaan xaaladaha saxda ah ee dunida, Isbarbardhiga fakshaniska fudud iyo kuwa adag, iyo barashada ku saabsan isleegyada, wada jira, iyo shaxanada iyadoo loo marayo isbeddelka joomatariga.
- **Saynis.** Falanqee isbeddelka caalamka ee ugu waaweyn iyo xalalka suurtagalka ah; samee oo isticmaal habab; qorshee oo fuli baaritanada; falanqee xogta.
- **Cilmiga Bulshada.** Baadh horumarada ugu waaweyn iyo ee ay sameeyeen dunidan casirga ah oo ay ku jiraan xuquuqaha aadanaha, kacdoonta dimuqraadiyada, iyo dhaqaaluhu.

Washington sidoo kale waxy leedahay heerarka **is dhexgalka deegaanka iyo sii waddida, Luqadaha Adduunka, xirfafadaha iyo farsamada gacanta** (Qaababka iyo heerka warshadaha ee dugsiga dhexe iyo sare), **aqoonta sare ee luqada ingiriisiga** (ELA, xisaabta iyo sayniska), iyo sidoo kale tilmaamaha **waxbarsho hore** (fasalka dhalashada-3aad) in la dhamaystiro waxbarashada si fiican loo soo koobay ardayda oo dhan.

Waxbarasho gaara: Ardayda hesha adeegyada waxay leeyihiin degaan, dib u habayn, iyo taageerada lagu tilmaamay qorshahooda waxbarashada shaqsiga ah.

Bartayaasha luqada ingiriisida: Ardayda baranaysa in ay ku hadlaan Ingiriisida waxay leeyihiin heerarka aqoonta luqadda ka caawiya macalimiinta in ay qorsheeyaan guud ahaan maadooyinka ku habboon heerka arday kasta ee horumarka luqadda.

FASALKA 10

Ujeedooyinka Waxbarashada Gobolka Washington

Gobolka Washington Sharci Dejinta ayaa aasaasay afar ujeeddo oo waxbarashada ah si ay u bixiyaan saldhigga horumarka ee dhammaan heerarka waxbarashada tacliinta ee gobolka:

1. Akhri fahamka, u qor si fiican, oo ula xidhiidh si guul ah siyaabo kala duwan iyo goobo iyo dhagaystayaal kala duwan;
2. Baro oo codso aqoonta guud iyo mabaadi'da xisaabta; bulshada, jidhka, iyo cilmiga nolosha; cilmiga bulshada iyo taariikhda, oo ay ku jiraan dhaqamada iyo ka qaybgalka wakiilka dowladda; juqraafiga, farshaxanka; iyo caafimaadka iyo jidh dhiska;
3. Fikir si falanqayn ah, macquul ah, iyo hal-abuurimo ah, iyo in ay dhexgalaan qorista cilmiga casriga ah si fiican iyo sidoo kale waayo-aragnimada kala duwan si loo dhiso xukun sababaysan iyo xalinta dhibaatooyinka; iyo
4. Fahan muhiimadda shaqada iyo maaliyadda iyo sida soo waxqabadka hawsha, dadaalka, iyo go'aannada si toos ah u samaynaya mustaqbalka iyo fursadaha waxbarasho.

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Office of Superintendent of Public Instruction
www.k12.wa.us

September 2016, Publication No. 16-0041

Imtixaanka Gobolka Washington

Sharciga federaalka waxa uu u baahan yahay imtixaanka sanadlaha ah ee ardayda fasallada 3-8 iyo marka ay galaan dugsiga sare farshaxanka luqadda Ingiriisida (ELA) iyo xisaabta, iyo fasallada 5 iyo 8 iyo marka ay ku jiraan dugsiga sare sayniska.

Gobolka Washington sidoo kale waxa uu u baahan yahay ardaydu inay ka gudbaan imtixaanada gaarka ah si ay xaq ugu yeeshaan inay ka qalinjabiyaan dugsiga sare. Haddii ardaygu aanu daboolin heerka hal ama ka badan imtixaanada loo baahan yahay qalinjabinta, isaga/iyadu waxay dib u qaadan kartaa imtixaanka, ama ay hesho waxa lagu beddelo oo gobolku ansixiyay.

Inta ugu badan ardayda dugsiga sare waxay qaadan doonaan imtixaanada **Smarter Balanced** iyo imtixaanada sayniska si loogu qanco shuruudahan. Imtixaanadu waxa laga yaabaa inla qaado iyagoo leh agab ama agab la'aan, taageerooyinkana ama guri dejinta.

Ardayda leh caqabadaha weyn ee garashada ee ku caddeeyay Barnaamijkooga Waxbarashada Shakhsiga (IEP) ay qaado Washington – Helitaanka waxbarashada iyo Cabirka (**WA-AIM**) ELA, xisaabta iyo sayniska.

Imtixaanka gobolka waa *inaanay* kaliya xukumin xirfadaha tacliimeed ee ardayga iyo aqoonta. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, fadlan la xidhiidh macalinka ilmahaaga ama dugsiga.

Fasalka 2019

Imtixaamada Looga baahanyahay Qalinjabinta

(Dooro mid maadadiiba)

FARSHAXANADA LUQADDA INGIRIISIDA

- Imtixaanka Smarter Balanced ELA
- WA-AIM

XISAABTA

- Imtixaanka xisaabta Smarter Balanced
- WA-AIM

SAYNISKA

- Imtixaanka bayoolojiga EOC
- WA-AIM

Waxbarashada ardayda ee ku hadalka Ingiriisida fasallada Barbaarin-12 waxay qaadan doonaan qiimaynta Aqoonta sare ee Luqadda Ingiriisida ee Qarniga 21aad (**ELPA21**). Qiimaynaha waxa lagu cabiri doonaa xirfadaha luqadda Ingiriisida iyo koboca sanadlaha ah ee akhriska, qoraalka, dhegaysiga iy ku hadalka. Ardayda hela heerka aqoonta sare ee Shaacinta ama Horumarinta ELPA21 waxay u qalmaan inay helaan adeegyada taageero ee barnaamijka luqadda Ingiriisida.

Imtixaanada Fasalka Heerka 2016–17

	3aad	4aad	5aad	6aad	7aad	8aad	9aad	10aad	11aad	12aad
ELA	✓	✓	✓	✓	✓	✓		1	1	3
Xisaabta	✓	✓	✓	✓	✓	✓		1	1	3
Saynis			✓			✓	2	✓	3, 4	3

Ogeysiiyo:

1. Ardaydu way karaan, laakiin loogama baahna, inay qaadato imtixaanada ELA iyo/ama xisaabta fasalka 10aad. Ardayda qaata midkood ama labadoodaba imtixaanka fasalka 10aad iyo kuwa gaadha Heerka 3 ama 4 uma baahna inay qaataan imtixaanka fasalka 11aad.
2. Fasalka sagaalaad waxay qaataan imtixaanka bayoolojiga ee EOC kaliya haddii ay qaadanayaan kooras gaar ah. Ardayda qaata imtixaanka bayoolojiga EOC kahor fasalka 10aad oo daboola heerka uma baahna inay dib ugu qaataan fasalka 10-aad. Baasitaanka imtixaanka bayoolojiga EOC wax looga baahan yahay fasalka 2017 iyo wixii ka dambeeya.
3. Waxay lagamamaarmaan tahay kaliya haddii ardaydu aanay daboolin shuruudaha qalinjabinta qiimaynta gobolka.
4. Ardayda leh caqabadaha weyn ee fahanka ee ku caddeeyay IEP-gooda waxay qaadanayaan qiimaynta saynis oo lagu beddelan karo fasalka 11aad, halkii ay ka qaadan lahaayeen fasalka 10aad, marka imtixaanka bayoolojiga EOC si caadiya loo maamulo.

- Qiimeynta Aqoonta sare ee Luqadda Ingiriisidu muhiim ayay u tahay waxbarashada ardayda si ay ugu hadlaan Ingiriisida. Imtixaanka ardayga si ay ugu qalmaan helidda taageerada. Waxay sii wadayaan imtixaanka, sannadlaha ah, ilaa intay gaarayaan aqoonta sare ee luqadda ingiriisida.

Waqtiyada Imtixaanka Gobolka

Imtixaanka waxaa loo qorsheeyey waqtiyadaan hoos ku qoran gudahood. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka si aad u ogaato taariikhda ilmahaaga lagu imtixaamayo.

WAQTIYADA IMTIXAANKA GOBOLKA	
Oktoobar 17– Abriil 7:	WA-AIM
Febraayo 1– Maarso 14 *(gaarka)*:	ELPA21
Maarso 6– Juun 9:	Smarter Balanced (Wacyi gelin dheeli tiran)
May 8– Juun 9:	EOC

OSPI waxay bixisaa wararka dhibcaha ee dhammaan imtixaanada kor ku xusan. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka wixii macluumaad dheeraad ah.

Maxaa Dhibcaha imtixaanka gobolka looga jeedaa?

Heerka **4** — **Heerka gaaritaanka ka sareeya:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **3** — **La kulmaya heer gaadhitaanka:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **2** — **Ku dhowaan la kulmi karra heerka gaadhitaanka:** laga yaabaa in u baahan yahay horumarin dheeraad ah si ay u muujiyo aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **1** — **Lama kulmayo heerka gaadhitaanka:** Ubaahan Horumarin la taaban karo si ay u muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

September 2016, Publication No. 16-0041